Göteborgs Stad

# Wada shaqaynta u dhexaysa iskuulka iyo guriga

Iskuulka iyo waalidiinta (dadka ilmaha ka mas´uulka ah) waxay mas´uuliyad ka wada saaran tahay inay abuuraan duruufo intii macquul ah suurtagelinaya inay ardaydu horumar ka sameeyaan waxbarashada. Sidaas darteed waa muhiim in wada shaqaynta iskuulka iyo waalidiinta ay fiican tahay. Si wada shaqayntaas loo sii wanaajiyo waxaa lasoo saaray habraac ku saabsan waxa ay kala filanayaan dadka iskuulka ka shaqeeya, ardayda iyo waalidiinta. Habraaca waxaa sidoo kale loogu yeeraa dukumentiga filashada.

## Sidaan ayaad ka filan kartaa iskuulka waalid ahaan

» In iskuulku dhammaan ardayda u abuuro duruufo keenaya inay horumar sameey-aan intii suurtagal ah iyadoo laga am-baqaadayo hadafyada waxbarasho ee manhajka waxbarashada iyo in iskuulku ka shaqeeyo in arday walba uu mas´uu-liyad iska saaro waxbarashadiisa iyadoo la eegayo duruufihiisa gaarka ah.

» In iskuulku mas´uul ka yahay ardayda wakhtiga ay iskuulka joogaan. Sida loo kormeerayo ficliyan iyo xaddiyan waxay ku xiran tahay da´da ardayda, baahidoo-da iyo bisaylkooda.

» In iskuulku kugu soo wargeliyo sida arday-ga waxbarashadu ugu socoto iyo macaa-milkiisa bulsho iyo in lagu lasoo xiriiro haddii ay dhacaan wax uu iskuulku u baahdo inuu kaala hadlo.

» In iskuulku uu si cad kugu soo wargeliyo wixii ku saabsan hadafyada iskuulka, nidaamyada muhiimka ah iyo shuruucda ilaalinta nidaamka. Iyo in iskuulku qeexo sida iyo markii iskuulka iyo guriga ay wada hadli karaan iyo cidda iskuulka joogta ee ka mas´uulka ah.

» In macaamilka iskuulku uu yahay mid xushmad ku dhisan oo laga wada shaqe-eyo xaaladda ilmaha ee iskuulka, siduu ugu faraxsan yahay, amniga iyo horumar-ka aqooneed.

» In iskuulku sameeyo ama suurto galiyo in la helo jiritaanka warbixin cad oo ka hadlaysa hadii ilmahaaga lasoo siiyay layliga guriga lagu soo sameeyo iyo inuu helo qalabka waxbarasho ee ku haboon casharka guriga lagu soo samaynayo.

» In iskuulka aad ka heshid warbixinta aad u baahan tahay markii ardaygu u wareegayo qaybo kale, iskuullada iyo noocyada iskuulka. Si kala wareegidda u hagaagto intii suurtagal ah waxaa aad u muhiim ah wada hadalka u dhexeeya (xiriirka) guriga iyo iskuulka inuu aad u fiican yahay.

## Waxyaalahaan ayuu iskuulku kaa sugayaa waalid ahaan

» Inay mas´uuliyad kaa saaran tahay in ilmahaagu iskuulka yimaado, sida ku cad waajibka iskuulka oo isla markiiba lasoo sheego haddii ilmahaagu uusan imaan karin iskuulka.

» Inaad mas´uul ka tahay in ilmahaagu iskuulka wakhtiga ku yimaado oo soo nastay.

» In ilmahaagu uu kalsooni u muujiyo xirfadleyda kala duwan ee iskuulka oo si xushmad leh ula macaamilo.

» Inaad qaabishid warbixinta aad ka heshid iskuulka iyo inaad ka qayb qaadatid kulamada iskuulku kugu casumo. Waa muhiim inaad iskuulka siisid macluumaad ku saabsan ilmahaaga iyo xogta halka laga lasoo xiriiri karo si iskuulku kuu helo waalid ahaan.

» Inaad ku garab istaagto oo ku dhiirigeliso ilmahaaga ka shaqaynta casharada iskuulka iyo inay agab iyo qalab sax ah usoo qaataan iskuulka.

» Inaad kala hadashid ilmahaaga shuruucda ka jirta iskuulka iyo sababta ay muhiim u tahay in la xushmeeyo dhammaan ardayda iyo dadka waawayn. Waxaa markaas adiga iyo ilmahaagu ka qayb qaadanaysaan in jawi fiican oo ay ku shaqeeyaan ay helaan ardayda, macalimiinta iyo dadka kale ee iskuulka ka shaqeeya.

## Waxyaalahan ayuu iskuulku kaa sugayaa arday ahaan

» In adigoo ka ambaqaadaya duruufahaaga aad mas´uuliyad iska saartid casharada iskuulka inta tabartaada ahna dedaashid.

» Inaad si wanaagsan oo xushmad leh ula dhaqantid shaqaalaha iskuulka iyo ardayda kale. Waxaad markaas ka qayb qaadanaysaa inuu iskuulka ka jiro jawi deggan oo amni ah iyo jawi deggan oo wax lagu barto.

» Inaad ka taxadartid agabka iskuulka iyo jawiga guud ee iskuulka.

» Inaad soo qaadatid waxaad u baahan tahay si aad si buuxda uga qayb qaadatid dhammaan xiisadaha maalinta gudaheeda.

» Inaad wakhtiga ilaalisid.

» Inaad isticmaashid luuqad dhawrsan.

» Inaad raacdid shuruucda nidaamka ka jira iskuulka iyo inaad ka qayb qaadatid inaad shuruucda wax ka dejisid.

» Inaad ka qayb qaadatid waxbarashada iyo shaqada iskuulka. Dhammaan ardayda waa inay saamayn ku yeelan karaan oo mas´uuliyad qaadaan iyadoo la eegayo duruufahooda gaarka ah.



## Ku saabsan habraacyada wada shaqaynta iskuulka iyo guriga

Dukumentiga wuxuu ku salaysan yahay sharciga iskuulka iyo manhajyada waxbarasho. Waxaa loo kaashanayaa xiriirka u dhexeeya iskuulka, ardayda iyo waalidiinta wuxuuna quseeyaa dugsiga hoose dhexe, dugsiga hoose dhexe ee ardayda baahida gaarka ah leh, dugsiga xlliga firaaqada, fasalka ebraadka iyo meelaha xilliga gaaban lagu sii hayo ilmaha ka wayn 12 sano (sida uu dhigayo LSS) ee maamulka dugsiga hoose dhexe. Dukumentigu wuxuu quseeyaa dhammaan waalidiinta, ardayda iyo dadka ka shaqeeya meelahaas.

## Haddii waalid ahaan aad dareentid waxyaalo iskuulka ka gaabiyay

Hadafku waa inay wada shaqaynta iskuulka iyo guriga ay si fiican u shaqayso iyadoo wada hadal dhexmarayo. Haddii waalid ahaan aad dareentid inay jiraan waxyaalo laga gaabiyay waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbisid cabasho sida uu dhigayo habraaca maamulka dugsiga hoose dhexe si loo qaabilo oo loo baaro cabashada. Waxaad sidoo kale soo gudbin kartaa cabasho af ama qoraal ah.

**Kasii akhri wixii ku saabsan sida cabasho looga gudbiyo iskuulka bogga goteborg.se**